## Ku Saabsan Barnaamijka

Barnaamijka Cadaaladda La-wareegista Guryaha ee Gobolka Washington (Washington State Foreclosure Fairness Program) wuxu bixiyaa la-talin hoy, gargaar sharci madani, waxbarasho iyo gargaar-gaadhsiin, iyo fursad dhexdhexaadin.

Wuxu barnaamijku wax ka qabanayaa sare-u-kaca la-wareegista guryaha iyada oo la hagaajinayo isgaadhsiin dhex marta dayn-bixiyeyaasha iyo mulkiileyaasha guryaha si looga baxsado la-wareegis guri markii ay suurtogal tahay. Waxa loo qorsheeyay in mulkiileyaasha iyo dayn-bixiyeyaashooda laga gargaaro inay gaadhaan xal.

### Ayay u banaan tahay inay ka qaybgalaan Barnaamijka Cadaaladda La-wareegista Guryaha?

Waxa laga yaabaa in mulkiileyaasha guri ay u banaan tahay dhexdhexaadin haddii ay dayn-bixiyahooda ka helaan Ogeysiis Bixin La'aan Dayn (Notice of Default) oo ay ku noolaayeen guriga markii habka la-wareegista guriga la bilaabay. Dayn-bixiyeyaasha yaryar qaarkood ayaa ka reeban dhexdhexaadin.

### Waa maxay dhexdhexaadin la-wareegis guri?

Dhexdhexaadin la-wareegis guri waa hab ah in cid saddexaad (dhexdhexaadiyaha) uu mulkiilaha guriga iyo dayn-bixiyaha ka gargaaro inay gaadhaan heshiis laga wada hadlay, cadaalad ah oo ikhtiyaar ah. Dhexdhexaadiyuhu ma aha xaakin isla markaana labada dhinac midna wakiil uma aha.

### Sidee buu mulkiile guri ku weydiistaa dhexdhexaadin?

Mulkiileyaasha guri iyagu isma soo gudbin karaan si ay u helaan dhexdhexaadin la-wareegis guri. Mulkiileyaasha guri waa inuu soo gudbiyo la-taliye guri ama qareen/looyar. Tilmaanta "Sida Barnaamijka Cadaaladda La-wareegista Guryaha ee Gobolka Washington u Shaqeeyo" ee ku ka taal qoraalkan yar ka fiiri wixii ah faahfaahin ee ku saabsan goorta la sameyn karo u-gudbin dhexdhexaadin. Mulkiile guri oo kasta ayaa **wakhti kasta** la xidhiidhi kara la-taliye guri oo **BILAASH** ah inta uu waco khadka macluumaadka ee Gobolka Washington oo ah **1-877-894-HOME (1-877-894-4663)** ama inta uu booqdo **www.wshfc.org/buyers/counseling.htm** ama **www.hud.gov/offices/hsg/sfh/hcc/hcs.cfm**. Intaa waxa dheer, waxa kale oo laga yaabaa in mulkiileyaasha guri ee dakhligoodu yahay mid hooseeya illaa dhexdhexaad ay u banaan tahay inay gargaar ka helaan khadka gargaar sharci madani ee gobolka dhan: wac **1-800-606-4819** ama booqo **www.nwjustice.org/what-clear.**

### Waa maxay kharashka lagaga qaybgalayo barnaamijka?

La-talinta guri waa **BILAASH**. Haddii loo gudbiyo dhexdhexaadin, kharashka soo gaadhaya mulkiilaha guriga waa $200. Sidoo kale dayn-bixiyuhu wuxu bixin doonaa $200. Kharashka waa in la siiyo dhexdhexaadiyaha ka hor dhexdhexaadinta. (Haddii wax ka badan hal kulan dhexdhexaadin loo baahdo, waxa dhici karta inuu yimaado kharash dheeraad ah.)

**Department of Commerce**
Innovation is in our nature.
www.commerce.wa.gov/foreclosures

WASHINGTON STATE
HOUSING FINANCE COMMISSION
www.wshfc.org

**QOF KASTA** ayaa wici kara **1-877-894-HOME (4663)** wakhti kasta si loola xidhiidho la-talin guri oo **BILAASH** ah oo loo helo gargaar ku saabsan la-wareegis guri.

Mulkiileyaasha guri ee dakhligoodu yahay mid hooseeyaa illaa dhexdhexaad ayaa sidoo kale laga yaabaa inuu u banaan yahay gargaar ay ka helaan khadka gargaar sharci madani ee wicistiisu bilaash tahay. Wac **1-800-606-4819.**

Booqo **www.homeownership.wa.gov** si aad u heshid macluumaad ku saabsan barnaamijka dhexdhexaadinta, ka-hortagga la-wareegis guri, waxyaabaha beddel u ah la-wareegis guri, sida looga baxsado inaad noqotid dhibane lagula kacay khiyaano ka badbaadin la-wareegis guri, iyo dheeraad.

Haddii aad dareensan tahay inaad tahay dhibane lagula kacay khiyaano ka badbaadin la-wareegis guri ama khiyaano wax-ka-beddelid dayn, cabasho u geyso Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Gobolka Washington oo ka xereyso barta ah **www.atg.wa.gov/fileacomplaint.aspx** ama Wasaaradda Hay'adaha Dhaqaale ee Gobolka Washington oo laga helo **www.dfi.wa.gov/consumers/complaint.htm** ama **877-RING-DFI (746-4334).**

Si aad u waraysatid in qoraalkan lagu heli karo qaab kale oo beddel ah, fadlan wac **360-725-2650** ama **TDD-TTY 360-586-0772.**

Si aad u dalbatid koobiyo ama nuqullo ah qoraalkan yar oo aad dadka u qaybisid, fadlan wac **800-746-4334** ama iimaylgaree **dfi@dfi.wa.gov.**

# Ma ku Soo Wajahday La-wareegis Guri?



## HA SUGGIN ILLAA goor dambe oon wax la qaban karin

*Raadso gargaar la-wareegis guri HADDA!*

# Sida Barnaamijka Cadaaladda La-wareegista Guryaha ee Gobolka Washington u Shaqeeyo

| | |
|---|---|
| **Wakhti kasta** | • Mulkiile guri wuxu la-taliye guri oo BILAASH ah la xidhiidhi karaa wakhti kasta. Wac **1-877-894-HOME (1-877-894-4663)** sida ugu dhakhsaha badan marka ay jirto halis la-wareegis guri. |
| **Tallaabada 1** | • Mulkiilaha gurigu wuxu ogeysiis ku saabsan xaqa fursad laga kulmo oo lagaga hadlo la-wareegis guri ka helayaa dayn-bixiyaha. Waxa tan la yidhaahdaa Ogeysiiska Ikhtiyaarada Ka-horeeya La-wareegis Guri (Notice of Pre-Foreclosure Options). Dayn-bixiyaha waxa laga rabaa inuu ogeysiiskan u diro mulkiilaha guriga ka hor inta aanuu soo saarin Ogeysiis Bixin La'aan Dayn.<br>• Haddii mulkiilaha gurigu weydiisto kulan (loogu yeedho "kulan iyo wada-hadal") ("meet and confer"), dayn-bixiyuhu ma soo saari karo Ogeysiis Bixin La'aan Dayn illaa 90 maalmood ka dib markii la soo saaray Ogeysiiska Ikhtiyaarada Ka-horeeya La-wareegis Guri. Tani waxay mulkiilaha guriga iyo dayn-bixiyaha siinaysaa wakhti la isku dayo in laga baxsado la-wareegis guri haddii ay suurtogal tahay.<br>• Kulanku wuxu u dhici karaa fool-ka-fool, haddii uu weydiisto mulkiilaha guriga, waxana lagu qaban doonaa degmada uu ku nool yahay mulkiilaha guriga.<br>• Haddii mulkiilaha guriga iyo dayn-bixiyuhu kulmaan oo wada hadlaan oo aanay gaadhin xal gudaha mudadan ah 90 maalmood, dayn-bixiyuhu wuxu soo diri karaa Ogeysiiska Bixin La'aan Dayn.<br>• Haddii mulkiilaha gurigu aanuu weydiisan kulan, dayn-bixiyuhu wuxu soo saari karaa Ogeysiiska Bixin La'aan Dayn 30 maalmood ka dib markii la soo saaray Ogeysiiska Ikhtiyaarada Ka-horeeya La-wareegis Guri. |
| **Tallaabada 2** | • Waxa laga yaabaa in mulkiile guri ay u banaan tahay dhexdhexaadin haddii la soo saaray Ogeysiiska Bixin La'aan Dayn. Waa in mulkiilaha gurigu la xidhiidho la-taliye guri, haddii aanuu horeba taa u sameyn, ama qareen si looga hadlo waxyaabo beddel u ah la-wareegis guri iyo dhexdhexaadin suurtogal ah.<br>• Haddii mulkiilaha guriga ay u banaan tahay, la-taliyaha guri ama qareenka ayaa magaca mulkiilaha guriga ku weydiisanaya dhexdhexaadin. Codsigan waxa loo gudbiyaa Wasaaradda Ganacsiga ee Gobolka Washington (Ganacsiga). Dhexdhexaadinta waxa la weydiisan karaa kaliya KA DIB soo saarista Ogeysiiska Bixin La'aan Dayn iyo illaa 20 maalmood ka dib taariikhda diiwaangalinta Ogeysiiska Iibin uu Sameynayo Mas'uul Guri (Notice of Trustee Sale). (Ogeysiiska Iibin uu Sameynayo Mas'uul Guri waxay mulkiilaha guriga u sheegaysaa goorta lagu talogalay in iibinta guriga ay dhacdo.)<br>• Haddii mulkiilaha guriga loo gudbiyay dhexdhexaadin ka hor inta aan la diiwaangalin Ogeysiiska Iibin uu Sameynayo Mas'uul Guri, lama diiwaangalin karo Ogeysiiska Iibin uu Sameynayo Mas'uul Guri illaa dhexdhexaadinta laga dhammeystiro. |
| **Tallaabada 3** | • Wasaaradda Ganacsigu waxay ogeysiisaa mulkiilaha guriga iyo dayn-bixiyaha in la weydiistay dhexdhexaadin, waxayna magacawdaa dhexdhexaadiye, oo dhinac walba u sheegtaa waajibaadkooda, sida dukumentiyada loo rabo dhexdhexaadinta iyo kharashka dhexdhexaadiyaha ee ah $200 oo laga rabo dhinac walba. Waxa tan la sameeyaa gudaha 10 maalmood marka Wasaaradda Ganacsigu hesho codsi dhexdhexaadin oo dhammeystiran.<br>• Maalinta dhexdhexaadintu dhacayso waxa soo qabta ama ballamiya dhexdhexaadiyaha taasoo aan ka dambeyn doonin 70 maalmood ka dib markii la doortay dhexdhexaadiyaha, haddii si kale aanay ku heshiin mulkiilaha guriga iyo dayn-bixiyuhu. |
| **Tallaabada 4** | • Mulkiilaha gurigu wuxu dukumentiyada la rabo u dirayaa dhexdhexaadiyaha iyo dayn-bixiyaha (gudaha 23 maalmood marka uu ogeysiiska dhexdhexaadinta ka helo Wasaaradda Ganacsiga).<br>• Dayn-bixiyuhu wuxu dukumentiyadiisa u dirayaa dhexdhexaadiyaha iyo mulkiilaha guriga (gudaha 20 maalmood marka uu helo dukumentiyada mulkiilaha guriga). |
| **Tallaabada 5** | • Dhexdhexaadinta ayaa dhacaysa.<br>• Mulkiilaha guriga waxa wakiil u noqon kara ama u hadli kara qareen, la-taliye guri, ama u-doode kale. Hase yeeshee, waa in mulkiilaha gurigu (dayn-qaataha (qaatashaa) ku magacaaban daynta guriga) uu qof ahaan yimaado dhexdhexaadinta.<br>• Waa in dayn-bixiyaha uu u joogo qof amar u haysta inuu wax ka beddelo daynta ama ku gorgortami kara heshiis qof ahaan ama teleefonka lagu heli karo inta lagu jiro dhexdhexaadinta.<br>• Waa in mulkiilaha guriga iyo dayn-bixiyaha labaduba si daacadnimo leh uga qaybgalaan habka dhexdhexaadinta dhammaantiis.<br>• Doorka dhexdhexaadiyaha ma aha inuu noqdo xaakin. Dhexdhexaadiyuhu waa cid saddexaad oo mulkiilaha guriga iyo dayn-bixiyaha ku dhiirigalinaya inay fiiriyaan dhammaan ikhtiyaarada, oo ay ku jirto wax-ka-beddelid lagu sameeyo daynta, si looga baxsado la-wareegis guri.<br>• Mulkiilaha guriga iyo dayn-bixiyuhu waxay gaadhi doonaan heshiis (wax-ka-beddelid dayn ama wax kale oo beddel ah), ama ma gaadhi doonaan heshiis waxana laga yaabaa in habka la-wareegista guriga uu sii socdo. |
| **Tallaabada 6** | • Dhexdhexaadiyuhu wuxu qorayaa cadeyn qoran oo ku saabsan natiijooyinka dhexdhexaadinta iyo in mulkiilaha guriga iyo dayn-bixiyuhu uga qaybgaleen si daacadnimo leh. Dhexdhexaadiyuhu wuxu cadeynta u dirayaa dhammaan dhinacyada oo ay ku jirto Wasaaradda Ganacsiga gudaha todoba maalmood ka dib dhexdhexaadinta.<br>• Haddii dayn-bixiyuhu aanuu si daacadnimo leh uga qaybgalin, waxa laga yaabaa in mulkiilaha guriga uu awoodo inuu la-wareegista guriga ku joojiyo maxkamad. |

**Macluumaad dheeraad ah ka ogow maanta www.homeownership.wa.gov**